



ROOSEVELT HIGH SCHOOL

Wajiga 4aad ee Mashruucu wuxuu bilaabmay Dayrtani




Shaqada mashruuca Wajiga 4 waxa la filayaa inay dhammaato oo uu ardayda diyaar u noqdo dayrta 2021.

Bilaabista dayrtan iyo sii socoshada ilaa sanadka dambe, Dugsiga Sare ee Roosevelt wuxuu heli doonaa horumar badan waxaana mahaddaas leh cashuur-bixiyayaashataageeray Curaarta Horumarinta Dhismaha Dugsiga PPS

Xayiraadaha Galitaanka

Xayndaab Kumeel Gaar ah Qorshaha Badbaadada



Barkulan Teknoolojiyadda iyo Barxadaha CTE-ga oo Cusub

Wajiga afraad ee mashruuca casriyeynta Roosevelt wuxuu abuurayaa 10,000 fuudh oo laba jibbaaran oo kale si loo horumariyo barnaamijka dugsiga ee Barkulanka Teknoolojiyadda iyo CTE-ga. Sidoo kale wuxuu u baddali 1,161 fuudh oo laba jibbaaran oo Barkulanka Teknoolojiyadda wakhtigan ah fasalada sayniska wuxuuna sidoo kale u baddali Barkulanka Teknoolojiyadda 3,016 fuudh ee laba jibbaaran ee wakhtigan ee barxadaha CTE-ga Teknoolojiyadda Dhismaha.

10,000 ee fuudh ee laba jibbaaran waxa kujiri doona 3,250 fuudh oo laba jibbaaran oo ah barxadaha CTE-ga ee Teknoolojiyadda Dhismaha ee dabaqa koowaad. Dabaqa labaad waxa kujiri doonaa afar fasal oo ah 850 fuudh oo laba jibbaaran, oo leh gidaar kala qaybiya oo kolba si loo dhigi karo kaasi oo u dhexeeya laba kamid ah fasalada. Tani waxay u saamaxaysaa inay isku noqdaan hal fasal oo wayn marka loo baahdo.

Saamaynta ay ku leedahay Ardayda iyo Shaqaalaha

- Badbaadada cid kasta darteed, xayndaab kumeel gaar ah ayaa lagu soo wareejin doonaa aagga ka dambeeya tiyaatarka waxaana kujiraya dayrka dhinaca ku haya, jidka baabuurta N. Ida iyo baarkinkiisaa. Tani waxay yarayn doontaa baabuurta galaysa goobta. Isticmaalka dadka, iyagoo jidka dhiniciisa socda wax saamayn ah ku yeelan mayso. Sare Ka Fiiri Qorshaha Dayrka Kumeel Gaarka ah.
- Baarkinka baabuurta iyo ka soo galitaanka iridda jidka baabuurta ee North Ida waxay ku xaddidnaan kaliya baabuurta xaaladda gurmada markii laga maarmi waayo iyo wixii dhismaha la xiriira oo kaliya. Wixii baabuur kale ah inay galaan loo oggolaan maayo.
- Ka galitaanka iyo ka bixidda cirifka waqooyi ee dhismaha (albaabka ka bixidda sanduuqa Madow & albaabada galidda/bixidda ee Marinka Daaradda) waxa loo oggolaan kaliya ka bixidda xaaladda gurmada ah iyo carbisyada dabka markii laga maarmi waayo.
- Dadka iyagoo lugaynaya galaya garoonka taniska sinaba loo xayiri maayo. Isticmaalka dadka lugaynaya jidka dhiniciisu way furmaan doontaa.

Fursado Dheeraad ah oo Ardayda ah

U raridda barnaamijka CTE-ga Teknoolojiyadda Dhismaha dabaqa dhulka waxay siin doontaa barxad ku filan si uu u noqdo barnaamij CTE-ga dhismaha oo ganacsi si dhab ah u gali kara, oo leh fursado lagu barto alxanka, biyo-galinta, korontada iyo nijaaradda. Ballaarintu sidoo kale waxay laba-laabaysaa barxadaha teknoolojiyadda ee dugsiga! **Barkulanka teknoolajiyadda waxay bixisaa meel ardaydu ay kaqaybgalaan waxbarashada STEAM iyagoo u maraya fursado mashruuc kusalaysan oo gacanta laga qabanayo, bii'ad halabuur leh oo leh qalab casri ah, qalab iyo agab aan caadi ahaan fasalka caadiga laga heli karin.**

Wixii Macluumaad iyo Wacaan Dheeraad ah

Fadlan booqo Marxaladda 4 ee Roosevelt webpage: <https://www.pps.net/Page/14926>